

Tababarka dhaqdhaqaaqa nidaamsan, dhaqdhaqaaq furan



Giiji garbaha, hoos u dhig garbaha oo is deji.



Si raaxo leh u fadhiiso garbahana hoos gee adigoo is dabciyey. Saddex jeer qaado neef dheer. Caloosha ka neefso, waxa loo yaqaan neefsashada caloosha hoos loo goddo. Sanka neefta ka qaado adigoo tirinaaya ilaa 4. Neefta isku qabo adigoo tirinaaya ilaa 4. Neefso adigoo tirinaaya ilaa 8.



Daa daanka hoose ha nastee. Ku dhawaaq xarafka "M" si aad u hesho meel uu daanku ku nasto.



Samee dhaqdhaqaaq yaryar "gucle ah" oo daanka hoose ah, waxa loola jeedaa dhaqdhaqaaq degan oo kor iyo hoos ah iyadoo aanay ilkahu is taabaneyn.



Qunyar afka ugu kala qaad sida ugu weyn ee aad karto oo xidh afka, iyadoo aanay ilkahu is taabaneyn. Ku celi 10 jeer.



Afka fur waxoogaa. Daanka hoose sida ugu suurtoogalsan xagga hore ugu soo riic kadibna gadaal u celi. Ku celi 10 jeer. Iska ilaali inay ilkagu is taabtaan.



Afka fur waxoogaa. Daanka hoose sida ugu suurtoogalsan xagga bidix ugu soo riix kadibna gadaal u celi meel ku haboon. Ku celi 10 jeer. Iska ilaali inay ilkagu is taabtaan.



Afka fur waxoogaa. Daanka hoose sida ugu suurtoogalsan xagga midig ugu soo riix kadibna gadaal u celi meel ku haboon. Ku celi 10 jeer. Iska ilaali inay ilkagu is taabtaan.

Barnaamijka oo dhan waxa la sameynayaa 3 jeer maalin kasta.

Bilowga ayaa tabobarku keeni karaa xanuun yar iyo/ama raaxo la'aan. Iska dhow dhaqdhaqaaqa barnaamijka ee xanuunka tooska keenaaya ama keenaaya xanuun waara. Xiliga u dhaxeysa tabobarka haddii aad ilkaha isku qaniinto. Ka fikir in ilkahu caadi ahaan ay kaliya is taabtaan marka aad wax cuneeyso.